



Golaha La-talinta Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Dhaawaca Maskaxda ee Qarracan (TBI) ee Washington (Golaha TBI) ayaa loo aasaasay in uu taageero bulshada la ildaran dhaawaca TBI (RCW 74.31). Goluhu wuxuu ka kooban tahay 25 xubnood oo ka kala socda qaybaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, shakhsiyaad la ildaran dhaawaca TBI iyo xubnaha qoyskooda, bixiyeyaasha adeegga caafimaadka iyo aadanaha, daryeeyaasha, quruumaha qabiilka ee madax-bannaan, iyo hay'adaha dawladda.

Golaha TBI wuxuu iskaashi la leeyahay oo uu Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) iyo hay'adaha kale kala taliyaa in ay:

- Faafiyaan wacyigelinta iyo waxbarashada ku saabsan dhaawaca TBI iyo ka hortagga
- Aqoonsadaan oo ay sheegaan baahiyada iyo nusqaamaha ka jira adeegyada TBI, kheyraadyada, iyo mashaariicda
- Abuuraan iskaashiyo iyo isuduwidada guud ahaan qaybaha dowladda/kuwa gaarka loo leeyahay

Dhaawaca TBI ayaa qof walba saameyn karta. Si ay ugu adeegaan dadkan kala duwan, Golaha TBI iyo DSHS waxay bixiyaan taageero, macluumaad iyo gudbin, iyo kheyraadyo ka hortag:

- **Macluumaad iyo Gudbin (I&R):** Iyadoo la kaashanaya [WA211](#), ayaa qof walba oo la ildaran TBI ama qaba baahiyada la xiriira TBI wuxuu ka waci karaa 2-1-1 qof u tababbaran oo takhasus gaar ah u leh kheyraadka si uu ugula hadlo gudbinada ku habboon kheyraadyada bulshada ku saleysan.
- **Ololaha Wacyigelinta Dadweynaha:** Wacyigelinta dadweynaha ee lagu gudbiyo waxbarashada, gaarista, iyo munaasabadaha ayaa muhiim u ah ka hortagga iyo daaweynta dhaawaca TBI.
- **Kheyraadyada Kooxaha Taageerada:** Kooxaha taageerada barta internet-ka ayaa fursadaha ballaariyay oo gaarsiiyay dhammaan dhinacyada gobolka. Kooxaha taageerada waxay xoogga saaraan isku-xirka iyo waxbarashada iyagoo gacan ka geysanaya diyaarinta aqoonta mudda-dheer iyo xirfadaha xallinta-dhibaatooyinka si ay gacan uga geystaan ka gudubka caqabadaha horyaalla joogteynta gudashada waajibbaadka nololeed.
- **Buug-hawleedka iyo Kheyraadyada dhaawaca TBI:** Buug-hawleedkan ayaa loo sameeyay in uu noqdo kheyraad loogu talagalay kuwa uu la soo gudboonaaday dhaawaca TBI in ay helaan ka soo kabasho iyo baxnaano.

BAAHIYADA GUUD EE LA XIRIIRA DHAAWACA TBI:



Adeegyo



Guryeyn



Kaalmo Xagga Sharciga ah



Shaqo



Dharka iyo Agabka Guriga



Gaadiid



Daryeel Caafimaad

ISKAASHIYADA IYO LA-TALINTA ISTIRAATIJIJIGA AH

Iskaashiyada istiraatiijiga ah waxay ka faa'iideystaan awoodda uu Goluhu u leeyahay faafinta wacyiga dadweynaha iyo waxbarashada, dhaawaca iyo ka hortagga gacan ka hadalka, iyo helidda kheyraadyo.

Dadaalladan waxay si wadajir ah u kordhinayaan in dhammaan dadka ay helaan, oo ay la socdaan dadaallo la beegsanayo oo ay ka mid yihiin, laakiinse aan ku xaddidnayn, kooxaha dhaqan ahaan isir iyo sinji ahaanba loo hayb-sooco, xubnaha ciidamada qalabka sida iyo halyeeyadii hore, dadka la dhibtoonaya guri la'aanta, dadka ku jira xarumaha asluubta iyo xabsiyada, dhibbanayaasha tacaddiga reerka ka dhex dhaca, iyo dadka ku nool degaamada miyiga ah.

Tusaalooyinka Iskaashiyada Golaha ee TBI:

- **Horumarinta Xirfadda iyo Cudduda Shaqaalaha:** Bixinta fursadaha waxbarashada cudduda shaqaalaha iyo horumarinta xirfadda oo lacag la'aan ah
- **Guddiga Bedqabka Taraafigga WA iyo Safe Kids Washington:** Ilaalinta ammaanka carruurta iyadoo la adeegsanayo beeraha bedqabka taraafigga, carwo caafimaad, ka hortagga dhaawaca, iyo soo bandhigga iyo qaybinta kursiga baabuurta iyo koofiyad adag
- **Dhaawaca TBI ee ka jira Asluubta Tijaabo-ilaa-Barnaamij:** Dhisidda wacyigelinta iyo taageerada laga helo nidaamka asluubta oo leh baaritaanka dhaawaca TBI, nafaani-waxbarasho, kooxo taageero, kheyraadyada dib-u-gelidda, iyo horumarinta xirfadeed ee waxbarashada cuddada shaqaalaha
- **Xog iyo Cilmi-baaris:** Ka wada shaqeynta cilmi-baarista iyo xog-ururinta dhaawaca TBI si faham wanaagsan loogu yeesho waayaha nololeed ee dadka qaba dhaawaca TBI, daryeeyaasha, iyo adeeg bixiyayaasha
- **Wacyigelinta Dadweynaha iyo Horumarinta Kheyraadka:** Iskaashi in lala yeesho hay'adaha dowladda iyo kuwa maxalliga ah, iskuullada, kooxaha bulshada, adeeg bixiyayaasha, iyo kuwo kale si loo kordhiyo wacyiga iyo helidda iyadoo la adeegsanayo gaaris la beegsado iyo horumarin kheyraadka



Iskaan garee halkan si aad wax badan uga oggaato!



Transforming lives

DSHS 22-1985 SM (4/24) Somali